

DADKA LAGU HOR SAXIIXO DOKUMIINTIYADA IYO DHAARTA (JUSTICES OF THE PEACE) WAXAY BIXIYAAN ADEEG BULSHO OO BILAASH AH

'Justice of the Peace' waxay awoodaan:

- Inay xaqiijiyaan dokumiintiyada nuqulka ah, oo ay ku jiraan fariimaha lagu qoro teleefonka gacanta (mobile phone) iyo kuwa ka muuqda kombiyuutarka
- Inay xaqiijiyaan ama marqaati ka noqdaan saxiixa dokumiintiyada
- Inay xaqiijiyaan dhaarta, dhawaaqyada (declarations), afideyfidyada (affidavits)
- Inay xaqiijiyaan aqoonsiga

Marka la siiyo tababar dheeri ahna waxay awoodaan inay maxkamadaha la shaqeeyaan oo bixiyaan warqadaha waaranka (warrants).

Sidee lagu helaa qof ah "Justice of the Peace"

Dadka "Justices" waxaa laga helaa New Zealand oo dhan, laga bilaabo waqooyiga fog (Far North) ilaa jasiiradaha Stewart iyo Chatham. Si aad u hesho qofka kuugu dhow booqo barta Internetka hoos ku qoran.

- **Justiceofthepeace.org.nz** ka dib dooro "Find a JP". Waxaad samayn kartaa inaad sii cayyinto raadintaada adigoo isticmaalaya magaalada aad joogto, xaafadda aad ka deggan tahay iyo nambarka boostada xaafadaada ama magaca qofka. Waxaa kale oo aad heli kartaa liiska xarumaha adeega (Service Desks) xaafadaada halkaa oo ay joogaan Justices of the Peace si ay dadweynaha ugu adeegaan (qasab ma ah inaad ballan sii dhigato). Goobahan waxaa ka mid ah Hay'adda Talo-bixinta Shacabka (Citizens Advice Bureau), suuqyada waaweyn (shopping malls), laybareeriyada iyo Maxkamadaha Degmada.
- Waxaa kale oo aad ka baadhi kartaa magaca iyo teleefoonka Justices of the Peace liiska buuga teleefoonada.